




Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?



Waxa Taciiqa Saarey Sh Dr:- Haytham sarxan
Bare Ka Dhigi jiray Masjidka Nabiga, Haddana Maamula
Machadka Assunnah.



Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Waa Ka Difaacay Xuquuqda Basharka Oo dhan Mudo Laga Joogo 140 Oo Sano.
- Wuxuu Xifdiyey Ragga iyo Dumarka yaryarka iyo dhamaan Dadka Taagta Daran.
- Wuxuu ilaaliyay Xuquuqda Xayawaanka dhirta wuxuu kaloo booriyay in ahmiyad badan la siiyo dhulka.
- Wuxuu ina Amray Akhlaaq wanaaga iyo in aynu Nidaaminno xidhiidhka ka dhexeeya aqaaribta iyo jaarka.
- Wuxuu seeska udhisay wada noolaanshaha muslimiinta dhexdooda iyo dadka aan muslimiin ahayn.
- Wuxuu Nidaamiyay Xidhiidhka usrada ama qoyska Taasoo koobsanaysa Xuquuqda wayn ee aabaha iyo hooyadu ku leedahay ubadkooda.

Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu Diiday Dulmiga waxaanuu ku Baaqay Cadaaladda iyo in la is jeclaado oo la is garabsado oo la is caawiyo.
- Wuxuu Ku Baaqay in la caawiyo ka Baahan sidoo kale in la booqdo ka Xanuusanaya iyo in la is jeclaado iyo in Loo nasteexeeyo mid kaste oo muslim ah.
- Wuxuu Muslimiinta u diiday dhamaan mucaamalaadka Xun xun sida Tuugada qishka iyo in xaq darro la isku dilo iyo dulmiga.
- Nabigu waa Ka Badalay Nolosheena iyo dabcigeena Xun xun una Badalay mid fiican.
- Wuxuu Baray muslimka in aanuu wax Xadin.
- Wuxuu Baray muslim in aanuu Been Sheegin.
- Wuxuu baray muslimka in aanuu khamri cabin.

Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu Baray Muslimka in aanuu Sinaysan.
- Wuxuu Baray muslimka in aanuu wax qishin.
- Wuxuu Baray Muslimka in aanuu dilin Gaalada heshiiska Kula Jirta Muslimiinta.
- Wuxuu baray muslimka in aanu8 dhibin jaarkiisa muslim ha noqdo ama gaal.
- Wuxuu amray qofka muslimka ah in uu u samo falo labadiisa waalid oo uu shaqeeyo haba ahaado waalidkii mid ay kala diin yihiinee.
- Wuxuu baray qofka Muslimka in uu udhibirsanaado ka Yar iyo dumarka iyo kuwa taagta daran iyo dadka waawayn intaba.
- Waxa uu baray qofka muslimka ah in aanuu cadaabin cid basharka ka mid ah iyo xayawaanaadka sidoo kale inaanuu fasahaadin Dhulka uu dagan yahay.

Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu baray qofka muslimka ah in uu u naxariisto oo uu jeclaado haweenadiisa oo uu ihtimaam siiyo oo u dhibirsanaado ubadkiisa illaa maalinka u danbeeya Cumrigiisa.
- Wuxuu baray qofka Muslimka ah in aaneey dhamaan xidhiidhka uu la leeyahay ubadkiisa .
- Muslim kaste waa jecelyahay nabi muxamed ﷺ in ka badan inta uu jecelyahay dadka Kale.
- Wuxuu u bushaareeyay nabi muuse iyo nabi ciise.
- Muslim kaste waa jecelyahay nabi muuse iyo nabi ciise Labadaba waxaanuu Rumaysan yahay in u fadli badanyihiin nabiyada oo dhan.
- Waxa Loosoo diray Nabi Muhammad ﷺ Carab iyo.


Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wax Farqiya Ma Kala Leh dadkiisu diintiisa dhexdeeda carabi iyo cajami toona Alle Ka Cabsiga Mooyee.
- Waa Muhammad ﷺ. Oo rasuulkii ilaahay ah.
- Maad garanaysaa maxay muslim kaste u jecel yihiin nabi muxamed ﷺ?
- Ma ogtahay wuxuu Muhammed ﷺ uga jeedo muslimiinta ?

Wixii intaa dheer ee ku saabsan barashada nabigeena Muhammad ﷺ...



Mawqica Sheekha



sarhaan.com



Machad Al Sunnah.



mahadsunnah.com